HORDHAC

Sheekadan oo la magac baxday “Maalmihii maldahnaa”waa sheeko ka waranayso dhacdooyin xaqiiqo ah oo aad kuu xiiso galinaysa, waxa ayna xambaarsantahay fikrado badan sida:

Barwaaqada dhulkeena taal, sida loogu baahanyahay in aan wadankeena dhisano oo wax ku barano. Ahmiyada ay leedahay in uu qofku qorshe yeesho oo uu noqdo mid uu ku socdo qorshahaasi,qiimaha waqtigu uu leeyahay iyo siday lagama maarmaanka ay u tahay in uu qofku noqdo mid ku baraarugsan. Qofka qorshaha lihi waxa uu isku wadi karaa waxyaabo badan. Muhiimada ay leedahay in qofku la tashado dadka ugu dhow marka ay arini qabsato.

Sheekadani waa mid xaqiiqo ah oo dhacday meel ka mid ah degaanada soomaalidu ay degto.

M A H A D N A Q

Waxa aan u mahadnaqayaa illaahay ka sokow, dhammaan asxaabtii ka soo qayb qaadatay fikradaha togan oo kala ah:

1-mohammed H farah

2-C/waaxid sh.Husein 3-C/raxman Dayib

Cudur-daarasho

Waxa aan ka cudur daaranayaa in raali la iga ahaado wax alaale iyo wixii khaladaad ah ee aad kala kulantaan,

Waa C/karim Axmed muse(Bux) oo idin leh akhris wacan.

XXXXXXX

Warfaa waxa uu ku dhashay magaalaada Sheed-dheer sagaashanaadkii taasi oo hoos tagta dawlad-degaanka soomaalida, una dhaw xudduuda dawlad-deeganka iyo soomaalidu wadaagaan. Qoyska warfaa ayaa ku lahaa magaalada Sheed-dheer ganacsiyo kala duwan,waxa ayna ahaayeen dadka ugu cad-cad magaalada waqtigaasi dhinaca ganacsiga. Waxa uu la noolyahay wiilkani aabihii oo guursaday xaas kale ka dib markii ay kala tageen aabihii iyo hooyadii.

Waxa ay ka mid ahaayeen dadka qoran qaxootiga Awbare. Ha'yadaha caalamiga ah ee qaxootiyada ka shaqeeya ayaa dadka ugu qaybiya raashin magaaladan(Awbare).



Dadka raashinka loo qaybiyo ayaa qaata aroor walba laamo xaabo ah; iyaga oo gala safaf dhaadheer. Warfaa ayaa bilawgii hore waxbarashadiisa ee malcaamada qur'aanka ka bilaabay Awbare. Nolosha oo ku adkaatay dabayaaqadii sagaashanaadkii maadaama aayadii culays aad u badan oo qofna xamili karayn ku haysay; taasi oo ka haysatay dhinacyo badan oo nolosha ka mid ah.

Waxa uu u wareegay magaalo kale oo ay ku noolayd habaryartii. Magaaladan ayaa ahayd mid aad u yar; suuqa marka aad ka dhaqaaqdo waxa muuqanayay bilicda iyo carafka ka soo baxaya dhirta ku beeran daafaheega, dadka magaalan degan ayaa magaalada ku dhex beerta Galley. Galleyda waxa cuna ayy aad u badan oo ku nool magaaladan yar.

Warfaa waa wiil fahankiisu aad u fiicanyahay; waxa lagu darey malcaamad haseyeeshee waa fule, waxa uu ka baqayay ayydan badan ee magaalada joogta. Waalidkiisu aad ayaa uu ula dadaalayaa laakiin isagu waa qalqaali; ma oga waxa lagu guubaabinayo oo dhan. Halka ay ka dhibiqday ayaa ahayd in gabadh boosooyad(jaariyad) ahayd oo guriga ka shaqaynaysay ay wax ka daydo isaga;markasta oo guriga laga kala tago.

Warfaa ma fahansana waxa ay doonayso gabadhani; dhib badan ayaa uu ku qabaa maadaama oo ay buurnayd oo marka ay ka lulato aqalku wada carfayay.

Waalidka(Aabihii) wiilkan yari waxa ay had iyo goor ku dadaalayeen in uu wax barto laakiin qalin pencil-ka istiigadiisa ayaa uu ka soo cunaa iyo dhuuxa, buugguna waa bilaa jaldi maalinta koowaad ee loo keeno. markii loo taag waayay waxa dib loogu celiyay magaaladii qaxootiga eeAwbare.

Waxa uu yimiday magaaladii oo xaaladeedii is badashay dadku ay bilaabeen in ay ka hayaamayaan, maadaama ha'yadihii waxsiinayay ay joojiyeen bixinta raashinka.

Warfaa waxa uu soo raacay gaadhigii ugu horeeyay ee dadka qaxootiga ku nool u daad guraynayay meelihii deegaan ahaan ay ka soo jeedeen.

Hooyadii ayaa soo ka xaysatay waxa ayna gaysay tuulo ay daganayd; oo la yidhaahdo Arabsiyo.

Markii gaadhigii ay kaga degeen Dilla maadaama Borama uu tagayay, waxa ay soo raaceen layntiin u socday dhinaca Hargeisa ilaa ay kaga dageen Arabsiyio. Wiilkan yari waligii ma arag baadiye; oo waxa uu la amakaagsanyahay dhirta dhaadheer ee ubaxa udgoon ka soo carfayo, lo'da midabadeedu kala jaad-jaadka yahay ee daaqaysa seeraha cagaaran iyo shimbiraha heesaya ee codadka kala rogashadooda la moodo laxankii qaraamiga ee subciska.

Waqti badan markii ay socdeen waxa ay la kulmeen shimbir dheer oo qoorteedu dheertahay; dhererkeeguna kan dadka ku dhawyahay, isagu wadnaha ayaa uu farta ku hayaa xilligan oo waa uu dubaaxinayaa naxdin awgeed hooyadii oo sharaxaysa ayaa tidhi:

Hooyo warfaa waxa la yidhaa(shinbirtan)talaabo-ragle ama sala-madhle.



Woxoogaa markii ay socdeen ayaa ay yimaadeen xaafad ay qaraabo ahaan iskugu dhawyihiin, waa ay ku leexdeen. Xaafadii ayaa aad u soo dhawaysay, waxa ay u shubeen shaah cadaysan maadaama waqtigii gu'ga lagu jiro. Xaafada duqsi aad u badan ayaa dhex duul-duulaya. Wiilkani waa mushiki kaliya waxa u muuqda duqsigani; shaahana afka ma saarayo oo naftu waxa ay leedahay waxan oo duqsi ah koley shaahaagani in uu mid uun ku dhacay ayaa laga yaabaa waana uu iska dhigay.

Waxa ay ka tageen xaafadii xilli casar liiq ah, iyaga oo u dhaqaaqay dhinicii tuuladii ay ku socdeen waxa ayna sii marayeen hillino yar-yar oo kayn iyo wada daaq ah.

markasta oo cad-ceedu gaabato dhurwaagu waa uu soo dareeraa tuuladan.

Tuuladani waxa ka buuxa xer; qaar ka mid ah kaynta ayaa ay ku dhex xidhaan dadka dhimirka qaba iyaga oo raba in ay daweeyaan, habeen oo dhanna waa ay qaylyayaan dadkan dhimirka ka xanuusanayaa. kuwo kalena xoolo ayaa ay qashaan oo waa ay xadraynayaan habeenkii, waraabuhuna habeenkii waa uu ciyayaa. waa markii ugu horeysay ee uu maqlo arkana waraabe xaqiiqa oo u qoslaya sida dadka, agtiisana yaac-yaacaya.

Maalintii waxa uu raacaa inaabtigii oo adhi ku eegaya jarar dhagaxaan ah oo daayeerku aad ugu badanyahay. Waxa ku dhacay hurdo la'aan maadaama habeenkii tuuladani wada qaylo tahay,dharaartiina wada xayawaantahay.

Warfaa ayaa uu ku dhacay madax xanuun, shuban maadaa oo xaalada caafimaad ee tuuladu aad u liidatay oo uu wareegayay maalin oo dhan.

Warfaa ciyaal yar-yar oo hooyadii dhashay ayaa bilaabay in ay la ciyaaraan; isagana sabirkii ayaa ka dhamaaday oo waa uu laayaa, odayga caruurta dhaley oo ahaa macalin iskuul ayaa ugu danbayntii yidhi:

Ilmaha yar iga kexee ama waynu kala tagi!!.

Waxa la geeyay baadiye kale oo ay awawgii aabe ku noolaa.

Markii uu la qabsaday deegaanka ayaa uu awawgii ku yidhi:

Awoowo adhiga inoo sii eeg hilib ayaan magaalada inooga soo iibine baska u horeeyana waan soo raaciye.

Markii uu adhigii dareeriyay waxa ay dacawo ka qabsatay lax. waxa uu u haystaa in dacawadu(dawacada) adhiga ka midtahay maadaama adhigu midabo badanyahay!!!.

Galabtii markii uu adhigii soo dheelmiyay ayaa awawgii ku yidhi awoowo adhiga neef ayaa ka maqan ee ciddee ayaad is aragteen?.

Jawaab: Awoowo laba iska ciyaaraya oo midina cawlantahay tan kalena madax madawdahay ayaan iskaga imiday markii ay joojin waayeen ciyaarta ee ay doorbideen in ay iskaga hadhaan raacitaanka adhiga kale!!!.

Awoow: Hhhh; dacawo ayaa la yidhaa taa cawlane maanta ka dib adhiga inooga ilaali.



Warfaa: Haye awoowo.

Marki uu la qabsaday deegaankii waxa uu bilaabay in uu u gudo oo uu tago kalalka cadaanka ah iyo gaafyada(Aroosyada).

Habeenkii ugu haraysay ee uu tago waxa uu balansaday gabadh ay jaaryihiin in ay caawa soo baxsato maada aabaheed iyo hooyadeed aanay u ogalayn . markii dhulkii madoobaaday ayaa ay ka soo dhacday xagga danbe ee xaafada ileen ardaaga waa lagu cawaynayaaye!!!!.

Waxa ay ugu timiday geed yar oo cufan oo uu ku balamiyay in ay ugu timaado goorsheegtu marka ay tahay todobada fiidnimo.

Gabadhan ayaa ah mid ilaahay joog iyo qurux ku uumay; waa qalanjadii oo qofa.

Dhuux: warfaa ma soo nabad hoyateen?

Warfaa: Qalanjo aad iyo aad.

Warfaa: Haye innamari.

Habeenku waa 14aad dharaar cad ah; xilliga lagu jiraana waa Karan badhteenkeed, waxa soo kacay miraale ma hiigaan ah ka dib markii uu qaaday roobkii casar liiqdii da'ay oo ay saxansaxadiisii joogto weli. Warfaa iyo dhuux waxa ay gaadheen arooskii.

Warfaa: Dhuuxeey ma sidanaa arooska baadiyuhu?

Dhuux: Haa indhahaagu maanay ashqaraarsanayn waxaas oo qurux ah jiib iyo jaan ciyaareed ka socda.

Warfaa: adiga ma qurux ayaa kuu muuqata?.

Bal sug aan indhaha aan woxoogaa marmaree!!!.

Dhuux: Yaa!!!!.

Innamari sida loo ciyaaro aan ku baree.

Warfaa: Horta ciyaartu ha ii danbaysee meeshu ma aroos farxadeedbaa mise waa goob uu dagaal ka socdo?

Dhuux: maxaad ka wadaa ileen way kuu muuqataa waxa ay tahay e' ?. Reebaadiyaha ayaa la yidhaa waa badaw oo aqoona

maleh; iyaga oo aad u yaqaan waxa kasta oo la xidhiidha baadiye, qaar ka mid ah reer magaalku ileen waa danbaska!!!.

Warfaa: ree-baadiye waligoodba waxaan loodirsan ayaa ay ku mashquulaan.

Waxa aan aad ula yaabanahay waa dadkan qof waliba soo qaatay budba-budkii uu ka waynaa ee xaafadooda yaaley iyo ragan,dumarkan intay fadhiisteen saf galeen kala roganaya sidii subciska quraanka oo kale(Daf).

Dhuux: Hhhhh, qofka ku soo raacaa hesteeriya ayaa uu qaadayaa sida uu u qoslayo. Wax dumar ah oo bud sita maad arkaysaa ?

Warfaa: maya.

Dhuux: Haddaba haddii aanad bud sidan annaga ayaad naga mid tehee hanbalyo.

Warfaa: Hhhh, nimcad ayaabay noqon lahayd aniga oo lahaanshihiina kali ku ah; nin boqora oo boqran uunbay waxaas oo dhani oori u noqon karaan Dhuuxeey qalanjo hhh.

Dhuux: Ogeh!!!. Budadku waa dhaqan caado loo leeyahay oo raggu waxa ay ku magacaabaan faro-laab, xarago ayay u isticmaalaan, qaar kalena waxa ay u soo qaataan haddii uu dagaal dhaco in ay isku difaacaan. Raggan iyo dumarka kala roganaya waxa la yidhaa “Daf” ee maaha subcis saaxiib; iga faa’idayso inta aan noolahay.

Warfaa: faa’iido hhhh. Gurigiina waadigii xagga danbe ka soo dhacay ee ooddii xoolaha waraabaha u baneeyay,taasina ma faa’iidaa?

Dhuux: Haa!!!!. Qalbi fariid jeclaaday naxdin iyo naxariis ma leh; haddii uu xeelad uu isticmaalana waa halka ugu saraysa ee bare laga gaadho. Markasta iyo meelkasta idheh barahaygoow!!!.

Warfaa: Bare marna xabiibti la leeyahay; marna faraha lagu fiiq-fiiqayo bare Dhuux hhh.

Dhuux: Bare-nimada iyo dareenka innaga dhexeeyaa waa kala laba.

Warfaa: Haye.

Waqtigu waa xilli danbe; goorsheegtuna waxa ay tilmaamaysaa in waabarigii aanay waxba ka hadhin, markii ay aad uga soo fogaadeen arooskii xaafadihiina aanay u dhawayn ayaa waxa markaliya dhulkii qariyay “Dhado.”

Waxa ay u socdeen koonfurta oo xaafaduhu ka xigeen laakiin markii dhulkii qarsoomay waa ay dham’een; waxa ayna u kaceen dhinaca galbeed ilaa ay u galeen odey doofaar galley ka ilaalinayay oo ka mid ahaa odayaasha xaafada oo waranyo ahaa!!!.

Warfaa waxa uu noqday sidii tiir oo kale naxdin awgeed, maadaama odeygu inanta reerkoogu ku odhan karo hebla

waaberigii ayaan arkay iyada oo ka timiday arooskii xaley ka dhacay rogga sil-silada buuraha geed-Oone!!. Waxa uu ka fikirayay sideed u bad-baadin kartaa?!!.

Warfaa: Shalmada bixi!!!; waxa aan rabaa in aan go' ka dhigto adiguna boggayga soo hoosgal oo ha hadlin anniga uunbaa hadlayee, iga mar dhinaca uu joogo maahee dhinaca kale dhaqaaqna marka aan dhaqaaqayo!!!.

Waxa jab ka bilaabmay in uu odaygii dhaqaaqi waayay oo uu nasoo eegayo sidii carooga!!. Waxba uma sheegi karo iyada oo waa uu nasoo eegayaa, maxaa xal ah ayaan nafta waydiiyay?!!.

Waxa aan idhi: Aax waxa aan iska dhigay sidii qof qodaxi mudey waanan fadhiistey anniga oo Dhuux gacanta xoog ugu dhagay si ay u fadhiisato, ka dibna ayaan idhi maxaa xal ah?.

Dhuux: Odeygu haddii uu ina arko adiga oo I qarinaya iskana sii socda tuhun ayaa geli in aad wado qof laakiin ma hubo qofka ee inta aad kurka shalmada igaga qariso siina jeedso oo talaabo socod inoo wad ilaa aan libdhayno!!.

Warfaa: waa xal; shaanbad dibjirnimo ayay igu noqonaysaa laakiin wax walba adigaa ayaa ka muhiimsan ee innamari.

Fikradii ay soo jeedisay Dhuux ayaa noqotay in ay badbaadiso, sidaas ayaa ayna ku dhaafeen odeygii waranyo.

Warfaa awawgii waxa uu leeyahay adhi aad u badan oo qof yari aanu eegi karayn, sidaa awgeed awawgii waxa uu doorbidey in uu ku biiriyo malcaamad.

Malcaamada ayaa ah mid ku taala geli kasoo rogmada laf, waxa agteeda ah beer qurux badan oo dareemadu isqabatay.

Beerta malcaamadu ku taal ayaa ah mid ay ku yaalaan dhir cayn-cayn ah, deera-deeradu ay dhex lugaynaysa aroortii, goodirku da' walba leh,libaaxa shaashkiisu dhalaalayo iyo cawsha la joogitaanka la qabsatay ee marka ay ku aragtaba xagaaga u soo dhaqaaqaysa iyada oo dhasleynaysa!!.

Wiilkan yare ee malcaamada la keenay aad ayaa uu ugu faraxsanyahay jawiga ay malcaamadu ku dhex taalo ee il-doogsiga leh.



Ardeyda malcaamada dhigata ayaa u qaybsamay laba qaybood,qayb xayawaanadan ka baqaysa oo aanu casharku ku socon iyo qayb jeclaysanaysa oo raba in ay dhex galaan oo aan fahmin waxa loo dhigayo maadaama maskaxdooda oo dhanni ay xaggan u jeedo.

Warfaa aad ayaa uu ugu danbeeyay dadka maadaama looxiisu aad u yaryahay.

Waxa malcaamada dhiganayay inaabtigii oo qof kale ay isku loox ahaayeen; inaabtigii ayaa rabay in uu soo gaadho warfaa sidaa awgeed waxa uu siiyay looxii waynaa ee ay ku dhiganayeen isaga iyo saaxiibkii, laakiin wiilkani(inanka kale) ma ogalayn in qof ka danbeeyaa ay isku loox noqdaan.

Mudo labo sanno ah oo ay dhiganayeen warfaa iyo inaabtigii malcaamada ugu danbayntii waa ay dhameeyeen.

Shayga ugu saamaynta badnaa ayaa ahaa in macalinkii qur’aanka kitaabkii ka dhacay farxad daraadeed, ka dib markii la gudoonsiiyay adhigii laga bixiyay warfaa iyo geelle oo ahaa 12 neef oo adhi ah.

Warfaa: Malcaamadii waa ay innaga soo idlaatay, maxaa xigga geeloow?

Geele: waa inaan tagnaa iskuulkaa lafta ku yaala ee lagu dhisay lacagtii xaafadaha laga soo ururiyay!!!.

Warfaa: maxaa uu iskuulku faa’iido leeyahay,mar haddii aqoonta wadankeenu aad u liidato, aqoonsi caalami ah aynaan lahayn oo meeshaad doontaba aanad tagi karayn iyo isbadalka bulshadeena oo u baahan boqolaal sanno?.

Geelle: aqoontu sidan uun ahaan mayso, aqoonsi la’aan uun waligeenba ahaan mayso, nolosha bulshadeenuna halkan uun waligeed taagnaan mayso ay manta taagantahay ee waxbaa isbadeli doona.

Wax waliba waxa uu ka bilaabmaa bar bilaw; intaa wixii ka danbeeya fac-faca ka danbeeya ayaa uu u sii dhiibaa si uu halkaa uga sii anba qaado ee ha deg-degin waligaa, sidaa awgeed waa in aynu innagu ku bilawnaa rafaadkan si ay faca inooga danbeeyaa u nastaan.

Warfaa: jawaabta xaggeed ka keentay ileen kuumaba bilawna oo imika uunbaad malcaamad dhamaysee?.

Geelle: Xaafadayada dhexdeeda ayaa ay maalin kasta ka taagantahay su’aal ah sideen bulshadan nolosheeda wax uga badeli karnaa?

Geelle: adigu halkeed ka keentay su’aalahaagan niyad jabka tilmaamaya?

Warfaa:kal-hore oo aan aabo u raacay maqaaxi iliidku iskugu yimaadaan ayaa mid niyad jabsani hadaladani sheeg-sheegayay!!!!.

Geelle: annigu waxa aan lee ahay warqado jabuutiyaan ah; waxa aan rabaa in aan samaysto passport maadaama aananjaamacad geli Karin aniga oo aan haysan. Waxa aan isku ognahay khayr annigu jabuuti ayaa aan u safrayaa beri'e.

Warfaa: Haye, Alle haku garab galo saaxiib.

Warfaa: Dadka iskuulku maadaama ay ka imanayaan baadiye tollow maysoo qaadan doonaan budad; sidii arooska oo kale?!!!.

Waxa uu iskuulku ku yaalay deegaan aad u qurux badan oo gol ah.

Waqtiga uu iskuulka iskuulka bilaabay Warfaa waa diraac dhulku uu barwaaqo yahay, oo xareedu meel walba ay jiifto, rahuna nawda gurayo.

Iskuulka Warfaa uu bilaabay waa mid qabyo ah dhinaca ku raasta iyo agabyada kale; sidaa awgeed bilawgii hore waxa uu ku fadhiisan jirey tobanley cad, halka ay ardeyda kalena kaga fadhiisan jireen daasad niidooda Nura. Dhawr bilood markii uu dhigtay iskuulka ayaa maalin maalmaha ka mid ah u direy macalin layli; waana uu ka soo shaqeeyay laakiin macalinka ayaa ka qalday, qalad uu fahmi waayay Warfaa in uu u saxay iyo in uu ka qalday(x huruda)!!!.

Qolonbi: Saaxiib warfaa eeg sida uu anniga macalinku iigu saxay, haddii hawaabtaadu saxtahay siday oo kale maxaa uu kuugu sixi waayay?.

Warfaa: macalinkani waxba magaranayo saxdu waa sidaa, khaladkuna waa sidaa(x) laakiin sidani halkay raacsantahay(x huruda)?.

Qolonbi:Hhhh.

Khadiija: keen eegee?.

Koley waa qalad; mar haddii aanad soo saarin natiijada ay ardeyda kale soo saareen ee uu saxda siiyay.

Qolonbi: Innamariya aan hoyanee!!!!.

Warfaa:innamariya.

Khadiija: Jawigu qurux badanaa, ileen gurigan yare ee aan ku jirney waa xabsi mudada lagu xidhnaanayaa ay gaabantahay uun!!!.

Warfaa: Hhh. Xabsiga ayaa laguu aqoonsanyahay in aad xidhantahay , adiguna aad adreemaysaa ama nafta ku sabirsiinaysaa waa lagu xidhay.

Qolonbi: aduunka iskuuladoodu waxa ay leeyihiin meelo lagu ciyaaro xili-biriiga sidii aabo lahaa.

Khadiija: innagu ma aduun ayaa aan joognaa meel ree-hebel iyo ree-heebel uun ay ka hadlayaan ku weenii waxbartay ayaa aan ku noolnahay, caalamka kalena kuwoogii waxbartay ayaa meel gaadhsiiyay. Maxaa aynu ciyaar iyo caalam kale ka sheekayn bal horta daasadaha aynu ku fadhino hala innaga badelo..

Warfaa: Caalam iyo waxyaabahaa la iskuma mashquuliyo ee kolba maalinta aad joogto ayaa duruufteeda lala noolaadaa.

Qolonbi: waxa aad ka sheekaysaa oo dhani waa nolol maalmeed.Meelaha lagu sheekeeyo ayaa aan kugu tagaa aabo maalmaha qaar; waxa lagaga doodaa wadankeenu side ayaa uu ku hormari karaa oo aan calamka kalena wax ugu biirin karnaa?.

Khadiija: Su’aal kaa da’wayn waxba lama soo minguuriyo.Warka warfaa ayaa macquula. Jawiga manta waa kii ay tilmaamaysay heestii lahayd:

Cirku shubi ogaa dhulku rays qaboobaa, ramaas udgoonaa,geesi raacda dheeraa, koley maalin raayafardaragasha badanaa!!!.

Warfaa: Codkaagu ma xuma kaliya waad carab la’dahay.

Qolonbi:Hhh.

Khadiija: hadal badanidaa oo micno daraa. Salaamada.

Warfaa iyo Qolonbi: Salaama mujaahidad.

Warfaa waxa uu iskuulka dhiganayay afar sanno; sanadkasta waxa uu galayay kalinta koowaad. Jaa'isada iskuulka lagu bixiyo ayaa ka koobnayd: Qalin-qori,buugaag,buskud iyo nac-nac oo loo kala badiyo sida ay ardaydu kaalmaha u kala galeen. Semister-kii labaad ayaa warfaala dulmiyay markii laga jarey dhibcihiisii uu shaqaystay qaar, isaga oo macalinku keenay kaalinta koowaad inan uu abtiugu toosnaa!!!.

Waxa uu aad u faanin jirey gabadhani oo uu had iyo goor odhan jirey: waa ay innaga far fiicantahay, eega markiiba waa ay dhamaysay qorista casharkii e'.

Waxa dhici jirtey in semester walba seddex-da kaalmood ee ugu horeeya ay galin jireen seddex wiil oo jaar ah. Waxa u cuntami wayday in seddex-dan arday kaliya ay semester walba gali jireen seddexda kaalmood ee isku xigga!!!.

Waqti dheer oo uu sabrayay waxa ay la noqotay maamulihii in uu sannadkii afraad semester-kii u danbeeyay in uu ka dhigo gabadha tan gashay kaalinta koowaad!!!.

Waxa caado ahayd in maalinta la yeedhinayo natiijooyinka imtixaanka ay soo xaadiri jireen gudida sare ee iskuulka,waalidiinta ardeyda dhalay iyo ganacsata tuulada ka soo jeeda oo caawin jirey ardeyda kolba waxa ay u baahanyihiin.

Markii la gaadhay maalintii loo balansanaa yeedhinta natiijada imtixaanka, ayaa ay cid waliba soo xaadirtey.

Qolonbi,Warfaa iyo Tuur ayaa ay u faraxsanyihiin, oo waa ay isgugujinayaan!!!!.

Maamulihii ayaa kacay dadkiina waa ay aamuseen; oo waxa ay dhugayaan yeedhinta magacyada ardeyda.

Mahadnaq iyo ka sheekayn mar xaladihii uu iskuulku soo maray ka dib,waxa uu bilaabay yeedhinta magacyadii ardeyda. Mararka qaar waxa ay dadka ku noqotaa amakaag marka uu isbadelo markaliya shay ay la qabsadeen waqti dheer.

Dadku dhagaha ayaa ay taagayaan marna ardeyda seddexda ah ayaa ay soo eegayaa!!!!.

Maamulihii: Waxa kaalinta koowaad galay Qamar.

Waxa kaalinta labaad galay warfaa.

Waxa kaalinta seddexaad galay Qolombi.

Waxa kaalinta afraad galay Tuur.

Seddexdii ardey ayaa uu midba kan kale eegay;isaga oo yaaban!!!.

Ardey walba waxa la siiyay hal warqad oo ay ku qoranyihiin dhammaan natiijooyinkii iyo maado walba inta uu keenay!!.

Warfaa waxa uu bilaabay in uu isku gaysto natiijooyinkiisii; ka dib waxa u soo baxay natiijo ka badan tan ay ardayadu kaalinta koowaad ku gashay!!!!.

Warfaa ayaa istaagay xilli ay weli socotay qaybinta waraaqaha aradaydu oo yidhi: macalin; annigu ma keenin natiijadan ee maxaa aad dhibcahaygii qaar iiga jartay?!!!. Dadkii ayaa markaliya ku soo jeestay Warfaa!!!.

Macalinkii: Fadhiiso weliba eber ayaan ku sine.

Warfaa: Eber oo aad isiiso ayaa iiga qiimo badan in aad dhibcahaygii aan ku soo daaley qayb aad iga jarto!!!.

Gudida maamusha iskuulka oo aad iskugu dhagaysanayay dooda u dhaxaysa macalinka iyo ardeygiisa; ayaa gabi ahaanba aan samaynin wax dhaq-dhaqaaq ahmaalintaas.

Maalmo ka dib waxa ay go'aan ku gaadheen gudidii in ay macalinkan maamulka ka badalaan oo ay u dhiibaan macalin kale, sidaas ayaa uu ku waayay macalinkii maamulnimadii!!!.

Wiilka yar oo aad uga niyad jabay iskuulka iyo macalinkaba; ayaa go'aan ku gaadhay in uu ka badasho iskuulka.

Warfaa ayaa aad ugu fiicnaa maadada xisaabta oo uu dhigi jirey maamulaha cusub.

Maamulihii ayaa kula taliyay ardaygii in uu iska joogo iskuulka oo ay wax waliba hagaagayaan!!!.

Maamule: Warfaa iska joog waxba ha badelane!!!

Warfaa: May; macalin ma joogi karayo!!.

Maamule: Haye, waan ku siinayaa badelka ee 20000Sh keen.

Ardeyga ayaa aabihii u bandhigay,laakiin waxa uu ka codsaday aabihii in uu iska joogo.

Warfaa: Aabo waan dareemayaa in aad rabto in aan kula joogo baadiyaha oo aan adhiga kula dhaqaaleeyo, laakiin waa ay igu adagtahay in aan waxbarashadayda ku sii wato meel la igu dulmiyay dharaar cad!!!.

Aabo: Haye, orad oo dedaal; sifiicana wax u baro.

Warfaa: Haye aabo.

Waxa uu ahaa ardey ka fikirayay duruuftii ka fikirayay duruuftii adkayd, dhibaatadii baadiyaha ee aabihii ku noolaa iyo waayahoogii nololeed, sidaa awgeed dadaalkiisu waxa uu ahaa xad dhaaf.

Warfaa waxa uu galay sanadkaasi lixaad isaga oo ka booday shannaadkii,ka dib waxa uu galay kaalinta labaad labadii semester ee sannadkaas.

Sannadkii xigay ee todobaadkiisii ayaa waxaiskuulka u soo badeshay gabadh ay xigto ahaayeen; xaggii baadiyahana ay jaar ahaayeen!!!.

Warfaa: Guudo soo dhawaw!!.

Guudo: mahadsanid, laakiin sawdigii iga hooseeyay waa side?.

Warfaa: Dumarkaba daansiyo, damac lagama waayoo waadigaa dagaalka bilaabay, iska dhaafoo laguma garanayee sawdigan qureyshta noqday!!.

Guudo: Adiguba woxoogaa waad yar qor-qorantay.

Guudo cadhada iyo ciil kaambiga ay qabtay waxa ay keentay in ay habeen iyo dharaarba wax akhrido si ay kaalinta koowaad u gasho.

Warfaa ayaa galey kaalintii koowaad labadii semester ee isla sannadkaas.

Guudo: adeerkii ayaa wax u dhiga isga ee annigu ma cidbaan haystaa?.

Hanwaynida iyo xiisaha uu u qabay waxbarashada awgeed waxa uu go'aansaday in uu tago secondary ay Suudaantu lahaayeen oo cusbaa xilligaas. Waxa dhiga iskuulka macalimiin ka soo jeeda wadamo kala duduwan.

Macalinka(Suuriyaan): Ma fahanteen?

Warfaa: Haa

Ardeydii: Maya.

Ardaydii: Adigu af-carabi magaraysid ; dadkii af-carabiga garanayay waxba kama ay fahmin, macalinkunalahjadoodii ayaa uu ku sharaxayaa ee maxaad fahantay?

Warfaa oo yaaban ayaa jidhiidhico awgeed timihii istaageen, ka dib inta uu xoq-xoqdey dhabanka ayaa uu yidhi: wax aan fahmayba waxa jira kalmada dufayl{Parasite) iyo fayras(Virus) oo uu ku soo cel-celinayay, laakiin casharku dhinac uu ka jeedo iyo dhinac uu ujeeday ilaa haddadaa aan inila hadlayo ma fahmin!!!.

Maxaa had iyo goor aan wax ugu baranaa luqado kale casharada ee inoo diiday in aan wax ku barano luqadeena hooyo?

Hirad: Waxa aynu noqonaydaasad shanqadhaysa maxaa aynu wax ku baran luqadeena?.

Cibaado: in aynu luqadeena wax ku barano wax aka horaysa in aynu faqriga ka baxno oo aynu yeelano wadan dhaqaalihiisu dhisanyahay!!.

Warfaa:Diifta,daalka,daranyada iyo dayaca ka muuqda bulshadeena waxa kaliya oo wax ka badeli kara jiilkeena wqtigani. Jiilka innaga horeeyay intii ay dhiseen waa ay burburiyeen;mida kale in ay dhisaan mar kale waa ay ku fashilmeen sodon sanno ka dib, innaga ayaa u maqan waxaas oo kala daad sanaan ah in aan dib iskugu ururino.

Ardeydii: waa xaqiiq biyo kama dhibcaan ah.

Hirad: macalinka(Suuriyaan) inoo dhiga tayadiisu ma xuma oo jaamacada ayaadhigaa qaybta caafimaadka waana Dr.

Macalinku lacagta uu qaato aad u badan awgeed; maamulkeenu waxa uu rabaa in la eryo.

Marar badan oo aan u sheegay mushkilada nakala haysta macalinka, marna kama garaabin mana odhan lahjada ha ugu sharaxine fusxada ugu sharax.

Cibaado: Maamulaheenii ayaa ay lexejeclo ka haysaa in uulacagta huro isaga aan jeebkiisa ka bixinaynoo ay ha'yadii bixinayso.

Marka wadan burburo bulshada dhaqankeega iyo akhlaaqdeeduba waa ay gadoomaan.

Ugu danbayn waa ay qalin jabiyeen waxana lagu dhawaaqi doonaa natiijadoodii secondary-ga. Arday waliba waxa farta ku hayaa wadnaha isaga oo ka fikiraya maxaa soo bixi doona.

Waxa ay ahayd maalmo murugo leh dhicida asxaab badan imtixaanka, kala hadhida arday noloshooda oo dhan asxaab ahaa markii ay qaar dheceen qaarna baaseen imtixaankii.

Waxa ay noo ahayd maalmo madaw, naxdin, argagax oo jidhku uu ku jidhidhicoonayo marka aad aragto walaalkaagii shaley

aad isla faraxsanaydeen oo ooyaya; walaashaadii shaley rayn-rayntu ka muuqatay oo dhulka laga qaadayo!!!.

Warfaa waxa uu iska fadhiistay gidaar; ilmadu hililiq ayaa ay ka leedahay, humaag madaw ayaa dahaadhay wajigiisa waxa ayna ahayd naxdin aanad garanayn magic aad u bixisid. Waxa baasay saddex ardey oo kaliya ardeydii oo dhan.

Saddexdii ardey midba ka kale ayaa uu sidaa u eegayaa hadal iyo hugun midna ma jiro.

Waxa loo qaaday saddexdii arday deeq waxbarasho oo dalka dibadiisa ah.

Waan ogahay xaalada aan ku jirno, waan dareemayaa niyad jabka inaga muuqda,waa ay ii muuqataa xaalada kadiska ah ee inagu dhacday laakiin walaal waxa aad ogtihiin in aanay noloshu manta uun ahayn oo berina jirto sidaa awgeed nolosha cusub ee aan bilaabayno ayaa muhiim ah in aan awooda saarno, asxaabteeniina aan waynayna aan dhiiri galino oo aan nidhaahno hore u socda.

Hure: Hye

Faahiye: ok

Maalin salaasa ah 10 subaxnimo ayaa ay ka duuleen garoonka wadankooga, waxa ayna gaadheen wadankii ay u socdeen maalintii labaad. Waxa ay ka soo duuleen wadankooga oo aad moodid istaanada gaadhiyaasha tuulooyinka u baxa istagaan!!!.

Hurre: Saaxiib horta garoonkeenii ma is tidhi waxa uu ahaa xaadhin sida xaadhinta Bakayluhu fadhiisto ama digaagaduhu isku nabaan marka ay xafashaan!!.

Faahiye: Xaadhintaba wadan kale ayaa innaga caawiyay ee innaga daa jiil fashilmay ayaa wadanka isku kaayaysanaya.

Warfaa: waad ogtahay waxa aan uga nimiday wadankaba waa baaba' uu ku jiro.

Ummad waliba iyaga ayaa wadankooga dhista maalin maalmaha ka mid ahna waa aynu is dhaafin!!.

Warfaa: in aan is dhaafino saw kama horeyso in aan bulshadeena dhisno si aan kacdoon u samayno, taasina waqti ayaa ay u baahantahay.

Faahiye: Dhib malaha saaxiib ummadaha cimrigoogu kuma xidhna cimriga dadka ee waqti dheer ayaa ay qaadataa, oo leh qorshayn,wacyi-galin iyo in kor loo qaado aqoonta ummadaas. Markaa haddii aynu innagu wax badeli kari wayno kuwa innaga danbeeya ayaa badeli ee innagu seeska aan u dhigno.

Wadankan cusub ee ay yimaadeen waxa uu ahaa mid uu maamulo kaligii-talis askari ah. Inkasta oo uu ahaa qofka maamulayay kaligii-talis cabudhin iyo cadaadis ay ku qabeen dadka siyaasiyiinta ahi, haddana dhinaca kale marka laga eego waxa uu ahaa wadan aad u horumaray.

Horumarkasta oo uu sameeyo qofka kaligii taliska ahi; marna ma mudna in la daayo oo uu ku sii fadhiyo kursiga si aanu u noqon mid la iska dhaxlo.

Waa wadan cimiladiisu ay dhex-dhexaad tahay sannadka intiisa badan.



Waxa uu leeyahay wabiyo ka yimaada xagga buuraha koonfureed ; oo soo dhex mara wadanka oo dhan . Dadku waxa ay u dalxiis tagaan quruxda, buuraha ay biyuhu ka soo butaacayaan iyo dhirta cagaaran ee halkaa ku taala oo aan laga helin meelo kale.

Buuruhu waa kuwo sil-silad ah oo dusha sare isku siman. Dadku waxa ay kufuulaan helicopter; intaa ka dib waa ay dul lugeeyaan si ay u qaataan neecawda qabaw iyo daawo u tagida gadaasha danbee ee buuraha oo ah meelaha ay ku yaalaan

harooyinka ugu caansan ee uu wadankani uu leeyahay.



Dadku waxa ay u daawasho iyo tamashleyn tagaan xilliyada lagu jiro fasaxyada.



Waxa lagu diyaariyay galabyo kala gedisan oo ay xidhaan oo dadka dabaalanayaa xidhaan. Dadka dabaasha yaqaanaa waxa ay leeyihiin noocyo qalabyo gaar ah, halka dadka ay ku cusubtahay loo xidho qalabyo plastic ah oo ka ilaaliya in aanu qofkani deign!!!.

Waxa uu can ku yahay bad xeeligeegu aad u dheertahay oo dadku ay uga kala yimaadaan wadamo kala duwan oo caalamka ah.



Wadan walba dadkiisa ayaa dhista. Majiro caalamka wadan horumarku la waabariistey ee wadan walba waxa uu soo marey jaranjar horumarineed.

Dhaqaalaha ugu badan ee wadankani waxa uu ka soo hoydaa dalxiis,marka laga tago xagga wax-soosaarka warshadaha.

Dhinaca waxbarashada waxa uu ka midyahay wadamada caalamka ugu horeeya.

Warfaa,faahiye iyo Hurre waqti dheer,sannado badan oo daal, farxad iyo qiirooyin ay ku lamaanaayeen ugu danbayn waa ay soo gabo-gabeeyeen hayaankoogii waxbarasho.

Warfaa: Hanbalyo saaxiibayaal

Faahiye: Hanbalyo


Hurre: Hanbalyo

Qalin-jabintii ka dib warfaa waxa uu ku soo noqdey wadanka, halka ay asxbaabtiisii kale uga dhoofeen wadan kale.

Warfaa waxa ay is barteen gabadh la yidhaa Hanni; oo uu dhexmaray dareen jacayl.

Hanni waa gabadh ku dhalatay magaalo madaxda gobalka Jilaabo ee golaad kunna bar-baartay halkaasi,waxa ay dugsigeegii hoose, dhexe ku soo qaadatay Golaad,intaa ka dib waxa ay u soo wareegtay xagga magaalada madaxda Hargeisa oo ay ku qaadatay dugsigeegii sare iyo jaamacadiiba.





wadda sheekaysi dheer ka dib waxa ay go’aansadeen in ay kulmaan,waana in uu ku beegmo kulankoogu maalin dalxiis ay isku soo diyaariyeen labadooduba!.

Hanni hiirtii hore aya ay ka soo baxday magaaladeedii ay degenayd(Hargeisa)si ay ugu kulmaan halkay ku balansanaayeen, halka Hannadna uu ka soo horeeyay isaga oo wax hurdo ahiba habeenkii xaley indhihiisa ayna ku soo dhicin!.

Subaxdii labalansanaa iyo saacaddii loogu talo galey ayaa la kulmay, waxa uu jawigu ku bilaabmay farxad ay lilmo la socoto lkn istaxalujin dheer ka dib waxa dhexmarey haasaawe, Hannad waxa uu ku bilaabay hadalkiisa bal in uu u yeelo hordhac galaan-gal u ah bilawga haasaawaha dhexmari doona qofkii aduunka uu ugu jeclaa lkn shayga cajiibka ahi waxa uu ahaa in aafeeftiisii ay noqotey mid uu kaga sheekaynayo meesha uu joogo sidii qof uga sheekaynaya sheeko qof kale kaasi oo aan la joogin,waxa ayna u dhignayd sidan:

Maalintu waa Arbaca (oo ah xilliga ay kulmayaan)waana 29 July sannadka 2005 goortuna waa abaaro 10:08 midhidh, ilbidhiqsiyadu iima muuqdaan mobilkaa smart phone ah !, cad_ceeda waxa dahaadhay daruuro cadaan iyo madaw iskugu jira,daruurahani qaarkood waa heeggo aad moodo in ay hoobaani ka soo daadanayso aragtidoodana ay iigu danbaysay 20 sanno ka hor.



Waxa dhacayaa waa neecaw leh ur sida marka uu qaado roobku ee aad urinaysid(Ray's), Mana aha mid kulul oo aanad dhididayn(Hanfi), mana aha mid qabaw oo kugu kalifaysa in aad Shaah karsato ama Buste, Koodh iyo wixii la mida aad nafta ku dadayso laakiin waxa ay la mid tahay sida marka diraacda ama karantu ku da'do dhul Ban ah oo uu qabsado dooggu gaar

ahaan ka geedaha hoostooda laydha ka soo baxaysa ee naftu ay u majiiranayso.

Maalintani waa maalin dareen leh, naxariis uu dareemayo qofku, humaagga kal_kacalku uu hargardaamo ku hayo labo kasta oo kala fog, dhir cagaaranni ay u muuqato oo u baxyadeedu kala jaad-jaadyihiin oo ay ka midyihiin u baxyadaasi:

Gudduud(casaan) cadceedu kolba in ay cayn ka dhigayso aad moodo, Caggaar cadceedu ay hayso oo dhalaalaya, Jaalle(Hurruud)hargardaamo aad ku iloobayso kuuna horseedaysa haasaawe jacayl oo ay hoballada oo dhanni u hanqal taagayaan. intaa haddii ay indhahaygu ku shiiqayaan anna Hanniyeey hawraarta jacayl laguma wada hungoobee Hurruudaasaan(jaalle)kuu hibeeyay!,shinnidu malabkay samaysaa waa Hurruude(jaalle) inta aan ka soo horgundhiyo u baxaas hurruuda(jaalle) ah maku idhaahdaa adigoo igu hawaawinaya hoo Hanniyeey!.



Intaa haddaan Hanniyeey hoo ku idhi waa dareen boholyow kal_kacale, anna habaaska jacayleed la keli noqdee maxaa hiila oo aad u haysaa hankaygan heehaabaya ?!.

Hanni:

Koley hamigaygaa tahee, habeenna hunguri igama gelin cid aan haybtaada ahayne !, halyeey aan ku hiirtiyo hortaydaad taal habeen iyo dharaare hiigso hansare,Innagoo hawdka lugaynayna hillin cad, hareeraheenana hoobaan bislaatay ka muuqato habaaska jacayl waa aan kaa haqab tiri !.

Marka aad fiiriso dooxadii Gabiley dagal qurxoon oo da'yartu ay ku damaashaadayso indhahaygu waa bay la daraandareene maxaa inoo diiday in aynu u degal roganno? .

Dhaxamaha dayreed, dabaylaha Xaggaa iyo fooraanta Diraaceed marka ay soo darandooriyaan adaan ku dugsi bidaaye ma dadab galnaa Hannadkaygiiyoow? .

Warfaa:

Horta Hanniyeey anba waa an kuu jeelanehee hore_hore ka tuur hadmay horseeddaa hadhaw hubsiimo halbaa la siistaa! .

Hanniyeey waligayba haamo ma hareer marine(kuma dabaalan barkad iwm), Harooyinka waawayn ee hareerahena tuban hadmay inoo horseedi karaan hor u socod (waxa uu u jeedaa ha inagu soo dadajin guur ee inoo dheeree waxoogaa isla socodkeenna) wacan! .

Hanniyeey noloshu waa ay noocyo badantehee naxariisaha udgoon(dhulka barwaaqada ah ee ubaxa udgooni kasoo baxay) maxaa diidaya hadaynu iskaga naaloono ?.

Hanni:

Horta hawaawigaasi waa halkiisee, balse haasaawaha hawd iyo honqocashada arooryaad(waxa ay la yaabantahay, sida ay u kala duwanyihiin haasaawaha iyo sida uu u arko isagu) waa labo aan isku hayb ahayne, horta maxa aad la soo heegantahay uun siddii haaddaanta?.

Haddii afkaygu hawl wacan qabo ku leeyahay, indhahayguna ay hareerahaaga humaaga yaal ka hinaasayaan, qalbigayguna adiga kuu holcayo mar uun haye maad itidhaahdid !

Warfaa:

Horta Hanniyeey anba hawli iguma yaree, haddana hiyikucu waa mid aan hoodo lahayne hoos u yara dhig, wax waliba maraate waa uu galaaye, balse fariintayda hore waa mid aan lagu hungoobayne ha dhayalsan hawlaheenna, waagii beryaba xareedii jiiftaa ii muraayadee xeelad kale ma haysaa oo aan iskugu kaa xayaysiiyo(wax aan iskugu kaa soo diyaariyo macnaha)?.

Hanni:

Koleey annigu yaabaye maxaa ku soo taagey uun siddii awr la keeneeyay ama kiddi(waa geed) surrin lagu abaqaaley? , Intaa haddaan ka yaabey kaba sii daranne kool-koolinta kalkacal ma ka deedbaa kalshaale laguugu soo sheegay(ma inta Xaggaa lagu geeyay ayaa wax lagugu soo akhriyay macnaha)?, Kaalmo kaama sugayee mar haddii waxaagu kariiryahay Orad oo karaydhaha(waa geed yar oo dhulka laga qoto oo la cuno xiddidkiisa, micneheegu waa meelahaa iska meerayso) kaydso.

Nin waliba kaalintiisa ayaa uu gaashaanle ka yehee horta Kalabaydhkiyo kastankiisa karantu ma kugula kulantay?.

Warfaa:

Hanniyeey karaydhihiyo karantu waa laba aan isku kalsoonayne(micnuhu waxa weeyi iska tag haddana aan iskaga nasano barwaaqada caqli maaha) kool_koolso kalkacalkaaga!.

Hanniyeey kool_koolsaan islahaa jacaylkaagee laakiin kulayka cadceediyo kaaraha soo kicitamay waabad ka darantahaye Oraddoo kudka ku day-dayo ku kale!.

Hanni:


Horta hadaad ma qasho jacayl macneheegu maaha in la isku hanjabayee, haddaan kuu dulmaro oo aan sawir ka bixiyo inyar waa sida meel cagaaran oo doog qurxooni ku yaalo; biyo xareed ahinna ay dhex marayaan, baarka dooggana ay hawadu xardhaaminayso keenuna waxa uu la midyahay sida anniga oo dhexfadhiistay dooggaasi dabadeedna yar kala xaadhay si ay u soo maraan waxoogaa biyo ah oo qiyaasan nadiifna ah, biyaha hortoodana ay ku yaalaan laba dooggoo hareerahooga laga gooyay dooggii kale marka ay biyahaasi dhexmarayaan maxa ay kula tahay in ay dareemi doonaan labadaasi geed ee doogga ahi?.



Warfaa:

Hanniyeey hamoodin in aan ku hiifayo ee waxa aan ahay marwalba hiilkaaga.

Waxa ay ila tahay in ay dareemi doonaan sida xilli roob May ahi da'ayo cadceeduna ay muuqato gacaliyuhuna uu hortaaganyahay gacalisadiisa oo jaakeeto ay xidhanyihiin,gacanta midigna ay ku haystaan koobab shaah ah oo diiran, gacanta bidixna laba Ubax oo qurux badan, dabadeedna ay iswaydaarsanayaan labadaasi Ubax ee cadceedu dhalaalinayso waxa ay dareemi lahaayeen(gacalisada iyo gacaliyuhu) ayaa aan filayaa in ay dareemayaan labadaa doogga ahina !.



Hanni:

Ooh!. hawlahaagu ma sahlana lagugu Mana yara, waa aad soo dhawaysay laakiin Jawaabtu waxa weeyi:

Sida meel caggaaran oo biyo xareed ahi jiifaan saxansaxadii xalayna ku dhacday, marka ay labada kal_kacalka isku hayaa darafka ka soo galaan iyagoo cagaagan; inta ay dhex mushaaxayaana ubaxyo is gudoon siinayaan tahniyadana isku dirayaan, waayihii ay soo mareena iska waraysanayaan, marka ay darafka kale gaadhaanna Telephone u soo dhaco kaasi oo sidda war loogu hanbalyaynayo natiijada shay ay sugayeen toban sanno, farxada ay dareemi lahaayeen aya ay dareemayaan labada doogga ahina!.

Tani waa aragtidaydee adna maxa aad u aragtaa inyar oo ka mid ah sifooyinka jacaylka qurxoon ?.

Hannad:

Horta jacayl hore uma soo marine haddaan waxoogaa yar qooraansaddo, waa sida anoo hor fadhiya Bijji(daaqyar)ubaxaysay dharabkii xalayna ku dahaadhanyahay, dhulkana ay dhaddadu qarisay kaligay inta aan shaah la fadhiistay bijjida dhineceega annigoo adiga ku naawillaya aad markaliya kaalay itidhi!, kugu riyaaqidda, rayn_raynta iyo naxdin farxadda aan dareemi lahaa ayaa ka mida sifooyinka jacaylka.

Hanni:

Waxba yaanan sheekada kugu daaline daaha aan ka qaadee, inanyahaw waxa aan ahay gabadh gaariyiyo gashaanti gayaan ah.

Warfaa:

Horta Hanniyeey waa gar, kaligaana kuma tihidde gaariyoo dhan ayaa gayaan u guntatay, gabadhyahay xaalka wadanka xoggogaal ayaa ad utahee maxaa aad xayndaabka u xeeladaynasaa oo aad ugu xadgudbaysaa?.

Hanni:

horta maxa aad dagal qurxooniyo deegaan daalay aad ka daba gureysaa?, dardaarankaagu waa daw eh balse da'daada dib ma u eegtay?, ma ogtahay ayyaamahan raggu waa qorsheeyaaye maxaa qalinkaaga u diiday in aad isku qabyo tirto?.

Noloshu hoos ayaa ay ka soo bilaabantaaye, da'yarna waa nahee aan dadaalnoo dalkeenana aan daaro ka dhisanno.

Ma ogtahay Hannadoow dabeecadda qurxoon, daganaashaha nolosha dib ayaa aad ka dareemiye, dalxiiskeennuna waxa uu ku danbayn dooxada Daarimee.

Warfaa:

Maxaad ka wadaa?

Hanni:

Halkeenii dabiiciga ahayd!. Waxa aan u jeedaa adigoo ku fadhiya dhaggax xarsho ah dooxada Daarima biyuhuna ay sidaa qallac uga leeyihiin xilli ay tahay casar gaaban ma xoriyadaad u xuubsiiban xilligaasi mise xaasle?.



Warfaa:

Dabcan ta danbe!.

Hanni:

Maxa ay kula tahay in uu xalyahay anuu waa aan xiiqee intaynaan xilgabin ?.

Warfaa:

Horta hanniyeey aduunyadu sidii hore maahin,qofkuna in uu qorsheyeesho ayaa ka fiican in wax walba lagu deg-dego, sida caadiga ah aniga waxa ay illa tahay horta sidii aan isku ogayn in qof waliba soo dhamaystiro.

Hanni:

Horta waa ay wanaagsantahay in wax la isla eego, miyayna ka fiicnayn in daaha laga qaado waxyaabahan mad-madowgu ku jirro, mida kale wax aan isku ogayn oo aan xasuustaa anigu ma jiro.

Warfaa:

Intaynaan is baran qof walba waxbaa u xariiqanaa oo uu naawilayay in uu mustaqbalka hello, markaa ma waxa aad leedahay waxba iima dajisnayn aniga?.

Hanni:

Haa qorshe waa aan lahaa intaynaan kulmin, waxyaabaha hadda aan kaala hadlayaana waa ay iigu jirtay bilaa magac uun buu ahaa, markii aad timidna kaaga ayaa aan ku ladhay!, adiga qorshahaaga maanay waxba kuugu jirin maad iska socotay uun?.

Warfaa:

Su'aashaadu waa ay wacantahay laakiin malaha quudhsi ayaa ku jira,nolosha qofku waa mid aad iskaga yar waqti ahaan inta uu haystaaba, waana lagama maarmaan in ay wax u yaalaan laakiin aniga waxa ay ilatahay in mawduucani yahay mid lagu xajiimoonayo!.

Hanni:

Xajiinaa!, xajiinaa!.

Warkaagu wax ka wayn,weedhahaaguna wareer badan,ana waa aan kuu war-warayaaye, willow warkaagu ha cadaado.

Warfaa:

War cad.

Ka hor intii aynaan is baran wa aan nastay, barwaaqaduna waxa ay ahayd mid jaan go’an(waa lagaa soo horeeyay)!.

Hanni:

Hanni oo wajigeega ka muuqday yabaal iyo xanaaq, kadib markii uu u sheegay in ay jirto qof kale, markaas aya ay tidhi:

-Dhakookiyo dhaan-dhaan la iskama dhige,

-Dhakadu ma sidii dhalaankiyo dhalan roganba ,

-Dhiil beeluhu waa mid aan waxba iska dhabine,

-Dhaguhu ma kuwo dhukay la dheel-dheeliyayaa

Mise Dhufaan dhurwaa laga soo dheelmiyaa tahay .

-Dhankayga ha soo marin dhalanteed iyo dhalaan uma dhago nuglaan kare e’.

Hannad waa wiil gob ah oo aad u jecel Hanni, weli ma qorshayn guur iyo waxyaabahaasi halka Hannina ay tahay qof halkay istaagto aan ka dhaqaaqayn.

Gabadha Hannad uu tilmaamay ayaa la yidhaa Hinda, waana gabadh ay isku fasal ahaayeen; waana gabadh fur-furan, kaftan badan, marwalbana ka ilaalisa qofka wixii dhaawacaya.

Hannad ayaa waxa haysta caqabad ah in aanu marwalba runta ka sheegin waxa uu rabo ama sida wax u qorshaysanyihiin, marka uu arko in qofka kale qorshaha uu wataa yahay mid ka hor imanaya kiisa!.

Hannad ayaa isla hadlay markii ay tagtay Hanni, waxa uu yidhi:

Hanniyeey halyeeyad baatahoo haweennoo dhan baad u horeysaaye

Haasaawahaygu hadduu ku haqabtiri waayay la iskuma hiife e’

Hiilna waan kuu ahay hadimo si aanay kuu haleeline

Habeenkii Hello aan ku idhi kuguma hungoobine

Hadhaw annaa ku soo habeen hoyne.

Hanni oo uu u cuntami waayay qofkii in badan ay ku taamaysay sida uu u dhaqmayo ayaa go’aansatay in ay fikirto; waxa ay ka yeeli lahayd mustaqbalka nolosheeda soo socota.

Hanni oo ahayd gabadh soo qalinjabisey ayaa qorshaheegu ahaa in ay marka hore ka agdhawaato saxansaxada udgoon ee ay intaasoo fogaani u dhaxaysay, intaa ka dibna ay sii wadato waxyaabihii ay rabtay inay xaqiijiso oo ay ka mid ahaayeen waxbarshada heerka sare iyo qorshayaal kale oo badan.

Hanni ma aha gabadh deg-deg badan oo markaliya go'aan qaadata laakiin aad ayaa ay uga fiirsataa go'aannada kama danbaysta ah ee ay qaadanayso kuna wajahan nolosheeda.

Hanni ayaa ah gabadh ku ad-adag waqtigeega, marwalbana isku dayda sidii ay uga faa'idaysan lahayd ee aanu uga dayacmeen waqtigeegu.

Qisaddii Hannad uga waramay Hanni oo saameeysay awgeed, waxa ay go'aansatay in ay mar labaad bilowdo master una safarto wadanka dibadiisa markan.

Hanni ayaa aad ula socotey waxyaabihii hareeraheega ka dhacayay oo dhan, waxa ugu muhiimsanaa in Hannad had iyo goor xaalkeega ka waraysto gabdh ay saaxiibo yihiin iyada oo had iyo jeerna siisa waxa uu uga baahanyahay in uu ka ogaado iyada(Hnni), inkasta oo war dhamaystiran aan la siinin!.

Hannad ayaa ay arintu aad ugu ciirtay ka dib markii ay kala irdhoobeen qofkii aduunka uu ugu jeclaa, dhinac uu ka bilaabana waa uu garan laayahay kaftankiisiina nabar ayaa uu ku noqday, waxaana sababay Hinda oo ahayd qofka uu sheegay in uu jecelyahay waligiina aanu jeclaan balse ay asxaab ahaayeen aad iskugu fiican.

Hannad waxa uu ogyahay in waqti xaadirkan aanu jirin waji uu kula hortago iyada(Hanni) , waxa uu is waydiinayaa su'aalo badan oo ay ka midyihiin:

- ma Hindaad inta aad hoos ula hadasho u dirtaa Hanni wax haka soo dhaadhicisee?

- ma saaxiibadeeda(Cawo) ugu dhaw ayaa aad tidhaa duruufaha kagan la iskuma daawadee sii nuxurka warkayga oo tifo tiran?

- mise indhahaad isku qabataayoo shaadh kale ayaa aad isku gelisaa?.

Markii ay ku adkaatay go'aan uu qaatana uu garan waayay, Hannad waxa uu bilaabay in uu kaligii iska heeso; waxa uu yidhi:

Dhinbiil caashaqbaan la dholon-dholey oo aan la dhuubtaye

Dheemanneey dharaar iyo habeenba adaan kugu dhaataaye

Dhediggoo dhanbaa iga dhababanoo naftu adigay ku dheelmanaysaaye


Dhaayaha dhiilbaa saaranoo siddii dharaartay u arkaan dhaclahaagee

Ana dheemanneey waa aan kaa dhur sugayaaye!.

Jahawareer badan oo uu sababay kala irdhoobidda qofkii dunida oo dhan uu hiigsanayay in uu mar labaad hanto, waxa ay ku kaliftay markan bal in uu Hinda oo ay asxaabyihiin is arkaan.

Hinda waa gabadh sifiican u taqaanna Hannad geedi dheer oo waxbarashanna ay soo wadagaleen, si fiican ayaa ay u fahmaysaa marka ay wax ku dhacaan isaga.

Hannad ayaa barqo hore baxay si uu ula kulmo Hinda, markii uu gaadhay halkii ay ku balansanayeen Hinda ayaa uu iska fadhiistay si uu usugo ilaa inta ay imanayso.



Hinda ilaa hadda waxa ay ka yaabantahay sababta ku dirqiday Hannad in ay sigaar ah u kulmaan isagga oo aan u sheegin sababta ay u kulmayaan, isagga oo garan la’ meel uu uga bilaabo gabadhii ay asxaabta ahaayeen haddana ah gabadhii magaceega laga diday.

Waqti dheer ka dib Hinda waxa ay timiday meeshii ay ku balansanaayeen, aragtidii ugu horeysay ama qac ku siintii isha way ku adkaatay in ay garato waayo waa uu is badelay Hannad habaaskii jacaylka awgeed.

Hannad waa uu salaamay Hinda iyadna waa ay ka qaaday, intaa ka dib waxa dhexmaray is xog waraysigan:

Hinda:

Haye, ma barideen Hannadoow.

Warfaa:

Haa barinay, Alxamdulilah waa lawada fiicanyahay walaal,adigu ma fiicantahay?.

Hinda:

Haa, Halkee ayaa aad ka dhacday wax wara iyo wacaltoona lagaama hayee?.

Warfaa:

Hhhh, waxa I mashquuliyay arimo badan oo igu gadaaman mooyee waa aan joogaa!.

Hinda:

Hagardaamo ayaa kaa muuqataaye bal warka isii.

Warfaa:

Hindaay jiilaal cadaaday qofna ma daganaado raas Omas ahe, balse xayska xeebeed haddii uu u hayaamana waxoogaa waa uu soo xag-xaganiye haddana waakii aan ku nagaanine, xaggee xigta oo aad ugu sahan tagi lahayd?.

Hinda:

Ma billawday sheekooyinkaagii khuraafaadka ahaa!, horta Hannadoow xagga hore haddaanad xil iska saarin xayd-xaydashada danbe xal maahee, haddana waxoogaa haddii la rog-rogo xal waara la waayi maayo!.

Warfaa:

Innaadeereey arintu halkaasay taagantahay magaca la igaga dudayna waakaaga anoo kaftamaya ee maxaa aan yeelaa?.

Hinda:

Yaa!, adna waa aad ogtahay in aanay waxba innaga dhaxayn oo aan ka ahayn walaaltinimada waxbarashada, balse wax dhoo-dhoobidaadii hadday kaa bariiqatay oo ruufad kula gashay, ana kugu eegi maayee xal mahaysaa?.

Warfaa:

Haa, innantii aan isku fasalka ahayn ee Cawo la odhanjirey ayaa aan barey inta aan sheekaysan jirnay markaa aad ayaa ay iskugu fiicanyihiin, warkana waa ay ka rasaysaaye ee adigu

Cawo la kulan oo hoos ugu yara dhig arinta waa ay habayne, anna waxa aan la kulmi Qaalib oo saaxiibkay dhaw ah, intaa ka dib Cawo iyo anniga ayaa kulmi dhanbaalkana Cawo ayaa aan u dhiibi laakiin arimahani sir ha innoo ahaadaan.

Hinda:

Haye, waa qorshe fiican bahalka jacaylka ahna aad ayaa aad ugu nugushahay oo diiftiisii ayaa kaa muuqatee hhh.

Maalintii labaad siddii ay balantu ahayd Hinda waxa ay la kulantay Cawo oo ahayd saaxiibadeedii geediga waxbarashada, salaam iyo isku tuur-tuur kaftan ka dib, Hinda waxa ay u dhiibtay Cawo warqad ay ku soo qortay qodobo biyo kama dhibcaan ah unna soo koobaya waxa ay u socoto iyo waxa kaga aadan innay qabato dhinaceega.

Markii ay akhrisay nuxurka waxa ku qoran warqada waa ay dhoola cadaysay, marka horeba warka ayaanay haysay halkay wax marayaan waayo Hannad ayaa had iyo goor u iman jirey Cawo si uu uga hello xog la xidhiidha Hanna.

Dood dheer oo la isku mari waayay ugu danbayntii Cawo waa ay tanaasushay aqbashayna in ay qabato waxa kaga aadan xageega, markii ay aqbashay Cawo ka dib Hindi waxa ay bilawday in ay u sharaxdo sida ay sil-siladu u socoto oo ayna ahayn in hadda Cawo loo baahnayn in ay war gudbiso illaa Hannad ay kulmayaan.

Cawo oo layaaban sida la iskugu kar-karay waxyaabahani aan is qabanayn ayaa sii dhawaysay Hinda oo galab caraabaysay, markii Hinda ay ka sii baxaysay gurigii Cawo ayaa waxa ay u soo jeedisay innay is dajiso oo aanay xaajada fududaysan.

Hannad oo ah wiilkan la hiinfaadhaya culayska haysta ee ka soo gaadhay bariiqashadii kool-koolintii jacaylka, ayaa ka war sugayay waxa ka soo bixi doona kulanka Cawo iyo Hinda.

Markii la soo gaadhsiiyay habeenkii in ay Cawo aqbashay codsigaasi, waxa ka kala degay Hannad culayskii saarnaa ee uu la dhibtooday waayahan.

Maalintii seddexaad Hannad waxa uu u xadhko xidhay siddii uu ula faqi lahaa Qaalib arintan ku dhegsan waayahan oo dhan, safar gaaban ka dib Hannad waxa uu gaadhay Qaalib isaga oo usii sheegin xataa in uu maanta arin ka leeyahay.

Maalintu waa Axad waana subax hore oo jawigu boqranyahay, Qaalibna waxa caado u ah in uu aroorta hore iska fadhiisto mid ka mid ah ku raasta ku dhextaal beerta uu aroortii wax iskaga aqristo.

Hannad oo xurguf-xorgufta haya ayaa daf soo yidhi Qaalib oo wax iska qor-qoranaya,Qaalib ayaa naxay misena kaca fadhiistay oo la anfariirsan waxa maanta dhacay salaam iyo is marxabayn ka dib isaga oo dharabkii ku soo dhacay dheelkii

xalayna soo leefay ayaa waxa loo soo shubay koob shaah ah uu isku diiriyo.

Hannad ayaa warka oo kooban siisay Qaalib sida ay wax u jiraan iyo halka sirtu ay ka qudhuntay!.

Qaalib ayaa ah saaxiibkan ugu dhaw Hannad si guudna uga warhayay in ay isaga iyo Hanni xataa qudhaanjo aanay kala dhex marin waxa uu kula taliyay saaxiibaw horta waa lakala helaa marka hore, kala helidaa hore ayaa waxay iskugu biyo shubataa nagaasho ama in la kala irdhoobo ugu danbaynta oo aan dib la isku haybsan, sidaan ogahayna labadiina waxa iniga dhexeeya wax ka wayn wax e’ ee aan dhiraan-dhirino ugu danbayntana aan u qorno dhanbaal dhamaystiran dhaylo dhalwadaad oo aan u dirno.

Gorfayn waqti dheer qaadatay ka dib; Hannad waxa uu qaatay talooyinkii saaxiibkii intii ka anfacaysay, intaa ka dib wuxuu macasalaameeyay saaxiibkii Qaalib goor barqo dheer ah.

Hannad oo ahaa ididiilo iyo rajo kunool ayaa markan wax walba iskugu hagaageen,waxa uu qorshaynayaa innuu si ka fiirsasho iyo baaraan deg leh u qoro dhanbaalkii maalinta beri ah aroorta hore uu u dhiibi lahaa Cawo.

Hannad waxa uu ku soo jeeday habeenkii oo dhan sidda uu u qori lahaa dhanbaal maldahan oo wada sarbeeb ah!, ugu danbayntiina wuxuu qorey mid wacan.

Markii waagii baryay ayaa uu Hannad bilaabay inuu iska diyaar garoobo si uu u gaadho xilli hore halka ay ku balan sanaayeen Cawo, Gurigana waxa uu ka baxay isagoo deg-degaya oo qaadiraysan shayga ugu darnaa waxa uu ahaa waxa ay noqon doonto jawaabteedu(Hanna) fartana wadnaha ayaa uu ku hayay.

Markii uu gaadhay halkii ay joogtay Cawo, waxa uu isla markiiba u dhiibay warqadii oo Envelope ku jirta, xagga ugu danbaysana waxa uu kaga qorey magacaanta waxyaabo hadyad uu ku yaboohayo ah ayna ku xidhantahay jawaabteedu waxay noqon doonto!.

Warqada uu qorey ayaa waxa badhtanka ugu jirey laba heesood oo kala ah:

Tan koowaad ayaa ahayd Galayryahaw dhagaha sii dheh,

waxana qorey Abwaan Ismaaciil Afburqade,

waxayna u dhignayd siddan:

Galayr yahaw dhagaha sii dheh

Adaa dhanbale samaha dheh

Dhibkayga dareen mar qura dheh

Dhanbaalkan ugee yartii dheh

Maalmihii kala dhoofki waa dheh

Waa taad Axdi meel dhigteen dheh

Welina Samir kama dhammaan dheh

Kalsooni kugu dhiiranoow dheh

Usheeg dhacdo waaye duni dheh

Dharaarba docbay jirtaa dheh

Hadduu kugu dhagey jacayl

Dadbaa kaa daran dhabtii dheh

Qaarbaa kaa daran dhabtii dheh

Qaarbaa u dhintoo hortaa dheh

Qaarbaa u dhintoo u dhintoo hortaa dheh

Kuwo ku dhex nool xusuus dheh

Yartii qalbi dhaya u sheeg dheh

Ninkii kugu dhaadan jirey dheh

Jacayl dhakafaar ku beer dheh

Dhankiisa adaa ku wayn dheh

Dhankaaga ka feejignow dheh

Cadaw ha udhaga nuglaan dheh

Ha dhaawicin wada jirkii dheh

Nasiibka waligaaba dhawr dheh

Heesta labaad waxa la yidhaa,

Dhankastoon kaa eegaba,

waxana qaada Cabdulqaadir Xasan Nageeye, waxayna leedahay siddan:

Dhexdaad madagta moodiyo

Dhabanada shubaniyo

Sanqaroorka dhuubani

Aan wali dheerayn

Ee meel dhexaadka ah

Daymada la dhaygagaaye

Dhan kastoon u eegaba

Yartu dhayla weeyoo

Habka ay u dhalatiyo

Intaa waxa u sii dheer

Dhakafaar

Dhakafaarna igu riday

Dharka xiirashadiisiyo

Dheelsiis socodkiyo

Dhaqaaqa iyo laafyaha

Garaaraha Gamcaha dhilan

Xibnaha markay dhagac

Dhagac

Dhagac ka siisee

Nafta hiba u dhiibaa

Quruxdii ilaah dhigay

Looma kala dhantaalinee

Waa loo dhammeeyee

Dhoolaha ilkaha siman

Warka dhihitinkiisiyo

Qosalkii baan la siidhacaye

Dhankastoon u eegaba

Yartu dhayla weeyoo

Habka ay u dhalatiyo

Intaa waxaa u sii dheer

Dhakafaar

Dhakafaarna igu riday

Indho dhaaya kuma arag

Dhego sheeka uma maqal

Aduunyada mid loo dhigo

Dhaaf oo wax kale

Dhiiga iyo ogaada

Yaa isaga dhex jeedaa.

Cawo markii ay gaadhay Gurigii waxa ay ku qaraacday Hanna oo wax iska akhrisanaysay xilligaasi; way soo kacday oo albaabka ayaa ay ka furtay misena waaba saaxiibadeed oo si kedisa ugu timiday, soo dhawayn ka dib saaxiibadeed ayaa su'aal waydiisay oo tidh:

Aa Hanna sawdigii lahaa wadanka dibadiisa ayaa aan waxbarasho u tagayaa, maxaa is bedaley?.

Hanni:

Haa,walaalo laakiin waxa aan fursad u helay iyada oo Online ah.

Cawo:

Haa, sax masha Allah.

Is xog-waraysi iyo wada sheekaysi dheer ka dib, waxa la soo gaadhay xilligii Cawo ay ka tagaysay saaxibadeed balse intii aanay ka tegin ka hor ayaa ay tidhi:

Hanna maanta waxa aan kuu wadaa hadyad qaaliya balse waxay tahay aanadeeda kuma lihi eed ee hoo!, laakiin waxa ku xidhan shardi inta aanan ku gudoonsiinnin ee ma fulineysaa?.

Hanni:

Cajiib!..., Hadyad la isa siinayo xilliga lakala tagayo waxa ku jirana aad iska fogeysay haddana shuruud ku xidhantahay, haye balkeen.

Cawo:

Hoo!.

Waa aan ku salaamayaa saaxiib nabad gelyo.

Hanni:

Nabadgelyo.

Dhuuxid dheer ka dib dhanbaalkii ay u siday Cawo Hanna waa ay ku qanacday waana ay aqbashay.

Shan maalmood ka dib waxa ay wacday Hannad oo ay ku daba-yartahay waxa ayna siisay jawaab dhamaystiran, farxad ka timid labada dhinacba oo ah boholyoow caashaq iyo isa soo dhawayn ka dib; Hanni ayaa bilawday in ay waydiiso su’aal Hannad oo sidan u dhignayd:

Haye, Hannad hawsheenu halkay ku dheelmanaysaa?.

Warfaa:

Hanniyeey doobnimadda iyo gashaantinimaduba waa mid aan waarayne, warkanna goos_goos aan kaaga dhiggee, waagii beryaba waayahaygu waa nooce, inta aan la innagu wiirsan waan aqballey, waynahanna innuu ina waafaqsiiyaan ka rajaynayaa wabillahi tawfiiq.

Hanni:

oooooh

Mahadsanid guul wadahaygii.

Hannad waxa uu doontay maalmo kadib Hanni waana loo meheriyay,intaa ka dib waxa la gaadhay maalintii arooska oo ahayd sidan soo socota:

Maanta waa maalin la sugayay xaqiijinteeda ka dib sanado badan oo uu dhexmaray boholyow caashaq aqoonyahanada Hanni iyo Hannad waxa uu dhacayaa aroosku xilli barwaaqo ah, dhul aad u qurux badan oo cagaaran lagana dhisay guri laba daryaale ah.



Qorraxda waxa qariyay maalintani heegooyin aad moodo in ay darroorayaan,dadku damaashaad, hanbalyo ayaa ay isku dirayaan farxada dadab galka awgeed laakiin Hanni iyo Hannad iyagu maba cabirikaraan xaalkooga maanta.

Waxa yaala meel walba cuntooyinka kala du_duwan ee hiddaha iyo dhaqanka, intaa waxa sii dheer aroosku waa mid la isku dhafay ciyaaraha kala du_duwan, cuntooyin,qaabka guriga loo sharaxay,qaabka gelbinta iyo qaybo kale oo laga soo xigtay halka ay Hanni ka timiday iyo halkan uu Hannad ka soo jeedo.

waxa dhacay ka hor intii aan la soo gelbin in ay caruuska iyo caruusaddu doorbidaan in ay koraan fardaha sharaxan, gaadhiyaashanna uga tagaan gacalka.



Waxa bilaabantay in xagga gurigii laba daryaalaha ahaa loo soo galbiyo lammaanaha iyagga oo fuushan fardahooga dhexdana baabuur ugu jiraan markii ay gaadheen gurigii waxa loo soo dhaweeyay si heer sare ah, waxana la ciyaaray ciyaaro dhaqan aad u qurxoon oo kala gedisan.

Hanni iyo Hannad waa laba aqoonyahan oo doorbiday inay arooskooga ku qabsadaan halkan(dhulka quruxda badan ee barwaaqada ah).

Waxa uu ahaa aroosku mid socday waqti badan oo ay dhacayeen damaashaadyo, waxa kale oo intaasi dheeraa

degenaasho iyo degel qurxoon oo diiftii jacaylka ay ku illoobeen lammaanuhu markii damaashaadkii dhamaaday dadkiina kala tageen waxa isku soo hadhay asxaabtii lammaanaha, intaa ka dib waxay doorbideen lammaanuhu bal markan inay kaayahooga noqoto oo ay cabiraan waxay soo mareen iyo halkay taaganyihiin.

Hanni waxa ay jeclaatay in ay cabirto waayihii ay soo mareen intii tognayd, halka Hannadna uu habeeyay intii tabnayd.

Hanni :

Mahadnaq rabbi kadib.

Marnaba waxaa aanan hilmaamayn halkii isku keen soo hagaajisay(baraha bulshada),Hello-dii u horeysay markaad hortayda ka muuqatay(vedio call) horeba hee kaa idhee hugaaga ayay hawl karnimo iiga muuqatay(waxay ku tusaysaa sida ay dumarku jeeb raac u yihiin kaliya waxa ay ku qiimaysay markii ugu horaysay muuqaalkiisa)!,waxaan habeenno badan haasawnaba hurdada aan hilmaamaba marna haddana hamaahsi imma helin.

Markani Hanni waxay rabtaa inay ka sheekayso dhulkii ay soo martay ilaa ay soo gaadhay magaaladii(Gabiley) uu ku noolaa Warfaa, waxa ayna ku bilawday sidan soo socota:

Dhulka oo dhan soo maree

Waxa aan dhiirrinaba dhirtii dhaayaha uroonayd soo aragnee

(waa geedaha Gabiley ku yaalla ee la yidhaahdo labadii kasta oo is guursadaa waxay beeri jireen geed)

dhamaantood dhiddid ayaa aan ka dheelnee

(markii loo sheegay in dhirtanni ay beereen maayaradii soo maray Gabiley oo aanay ahayn dhir jacayl ayay xanaaqday)

dharraaro kadibna adaa dharabka ka dhiraan_dhiriyee

(addaa ii sharxay wixii aanan garanayne)

dhabadda toosan waa lagu wada dheelmadaaye

dhaguhu adigay ku dhagaysanayaan mar hadday bilaa dhukay yihiinne(micnuhu waa mar haddaanay jirin cid been u sheegtay).

Waxa jirey maalmo qurxoonaa oo aan ubaxyada Banka aan kala naqaysan jirnay,dagal qurxoon ilaa dooxadii botoreed dhulka ay biyuhu qalalac ka leeyihiin.

Warfaa:

Waxa aan ka hadlaynaa waa war dhamaaday iyo maalmo tagey waxoogaa yar oo tabanna lahaa,intaasi ka dib Hannad waxa uu bilaabay in uu tilmaamo maalmahaasi in uu ku bilaabay sidan:

marka aad eegto fogaanta aan isku jirnay waxa aan marnaba miyirkayga ka bixin mala awaal,madax xannuun iyo ismaaweelayntuba waxa ay ahaayeen kuwo aan derris ahayn,

balse xannuunka ka derrani kaasi waxa uu ahaa markii ciiddu timaadee meel waliba ay xidhantahay la yidhaa mobilkuna bilaa qadaadiicyahay ana aan rabo in aan tahniyad u diro gacalisadayda.

Sannado badan oo sigaar ah iigu suntanaa waxa marwalba salka u fadhiyay mid aad mooddo inuu dardaranyahay oo aan kaba daalley(micnaha kolba inan ayaa usoo gogol fadhiisanayay Hanni), damacii waa uu batay iyadna way is difaaci jirtey anna dabayaaqadda wark aoo duuduuban uunbay itidhaa dhagaha u dhaadhici.

Waxa la soo maray maalmo adkaa, daallodhac dheeraa iyo indho doogsi badh ahaa dhamaantood laakiin waxa ay noqdeen kuwo dhammaaday, waxana soo daba waydaartay oon ku illoobay wixii isoo maray oo dhan maalin!.

Waxa aan rabaa Inaan su'aal ku waydiiyo gacaliso oo ah inaad nagarwaaqsiisid maalintii ay kuugu farxadda badnayd ee ku soo marta marka laga soo bilaabo is barashadadeennii ilaa maalinkan maanta ah?

Hanni:

Hhhh, horta gacaliye su’aallahaagu maxaa ay la ad-adagyihiin oo ay u yihiin kuwo dadka diiqad galinaya.

Maalmaha aan soo marnay aad ayaa ay u badnaayeene,kolleybana qof adiga ku haystaayi farxadi kama

dhinna Hannadkaygiiyoowe; balse haddii aan soo qabto maalin ka mid ah maalmahaas, waxa ay ahayd maalintii ugu horaysay ee aan ku kulannay dalxiiska waxa ayna ahayd maalin farxad daraadeed aad mooday in indhaha caad la iga saarey oo aanan ku arkayn…..,mana cabiri karayn hadal maalintaasi waayo waxa ay ahayd maalin aan jawi kale ku jiray!.

Qaali qofkii adiga ku helaa waa uu kugu indho qabawsanayaaye,

Quudhsi ka bad-baaday iyo quuto-quuto aan maalin walba isla qaylin lahaynne,

Qaaq waxa aan ka taaganahay qooraansiga ay qalanjooyinku qiil moodayaanne,

Qof lagu dhiirtiyo waxa tahay qunyar socdee qaali iinooloow!.

Markii ay ka jawaabtay Hanni su’aashii xaajigeega, waxa bilaabantay intaa ka dib in ay hadlaan asxaabtii carruuska iyo carruusada ee ka soo qayb galey arooska.

D H A M M A A D.

S H E E K A D I I

MAALMIHII MALDAHNAA

****